# Ma is la qaadacaadnaa apartheid?

APARTHEID FREE ZONE

## Ku soo biir ololahaan ka madax banaan Apartheid!

SUOMEN PALESTIINA-VERKOSTO
SUMUD
THE FINNISH PALESTINE NETWORK
صُمُود - شَبكة فِلسطين الفنلَنْديّة.

BDS FINLAND

## Aan aas aasno Finland gudaheeda meelo ka madax banaan APARTHEIDka!

Shaqsi, shirkad, bulsho iyo dhacdo ahaan  waxaad haysataa fursad aad u taageeri karto halganka Falastiiniyiinta ee xaquuqul insaan iyo xornimodooda.
Wax ka baro ololaha ka madax banaan APARTHEIDka, ee nagu soo biir!

Finland ololaha waxaa soo abaabulay Sumud – Shabakadda Falastiiniyiinta ee Finland.

## Waa maxay Meelaha/agaagga ka madax banaan Apartheidka?

Meelaha ka madax banaan Apartheid (AFZ=Apartheid Free Zone) waa meel loo baneeyay si loogu dhiso Midnimada & taageerida halganka Falistiiniyiinta ee xorriyadda iyo xuquuqda aadahana si firfircoon.

Meelaha ka madax banaan Apartheidka si cad ayay u iclaaminaayaan ka qaybgalka ololaha oo si hagar la´aan ah ugu dadaasho goynta xiriirka hay’adaha taageera nidaamka Apartheidka ee Israa’iil. AFZ wuxuu kor u qaadaa antiracism (cunsurinimo ka hortaag) iyo siman ahaansho, wuxuuna ka hor jeestaa dhaleecaynta Israel in lagu qaso antisemitism (yuhuud-neceb)

AFZ waxay ka qaybqaadataa qaadacaada bartilmaameedka ah ee ay dejisay dhaqdhaqaaqa BDS - oo ay ku jiraan qaadacaada dhaqanka iyo tacliinta - waxayna sii wadee qaadacaada ilaa Israa’iil ay u hogaansato sharciga caalamiga ah iyo mabaadii’da xuquuqda bini aadanka. AFZ waxay taageertaa wada sinnaashaha iyo ka hortaga cunsurinimada.

Dadka soo booqda aagga ka madax banaan Apartheidka waxay waqtigooda nagula qaadanaayaan waqtigooda damiir caafimaad qabra, iyagoo og in goobta ay ku sugan yihiin ay si hufan uga soo horjeedaan nidaamka apartheika ee Israel iyo xasuuqa Falastiiniyiinta.

Dukaan, kafateeri, maktabad, jaamacad, madxaf, bandhig faneed, goobta riwaayadaha, goobta bulshada, ama goobta maamulka dadwaynaha waxay isku iclaamin karaan inay yihiin Aag ka madax banaan Apartheidka.

Aagga ka madax banaan Apartheidka  waa olole caalami ah oo BDS ah oo loogu talagalay in la helo shirkado iyo bulshooyin si ay u taageeraan qaadacaadda iyo cunaqabataynta lala beegsanaayo ee ay soo rogeen dhaqdhaqaaqa BDS ee Falastiiniyiinta ay hogaamiso. Boqolaal goobood oo Yurub dhexdooda ah ayaa ku dhawaaqay inay yihiin Aagagga ka madax banaan Apartheidka.

## Sidee shirkadeena ama booskeena u noqon kartaa meel ka madax banaan Apartheid?

Shirkad kasta ama meel kasta waxay noqon kartaa meel ka madax banaan Apartheid (AFZ). Meesha ka madax banaan Apartheid wuxuu ballan qaadayaa:

1) mabaadi'da dhaqdhaqaaqa caalamiga ah ee BDS iyo qaadacaada la beegsaday,oo ay ku jirto ka jawaabista dalabaadka cusub ee BDS ee qaadacaada la beegsanayo mustaqbalka.
2) qaadacaada dhaqanka iyo tacliinta oo Isra'iil siduu dhaqdhaqaaqa BDS u dhawaaqay (PACBI)
3) in loo dhaqmo si ka soo horjeeda cunsurinimo.

Intaas waxaa lagu daraa, meesha ka madax banaan Apartheid:

4) si fagaare ah ugu dhawaaqo inay tahay meel ka madax banaan Apartheid
5) in lagu dhajiyo dhejiyeyaal  dhismaheeda oo sheegaya inay tahay meel ka banaan Apartheid
4) waxaa lagu daraa listka internetka sumud.fi oo tusinaya dhamaan meelaha ka madax banaan Apartheid (magaca goobta iyo magaalada).
5) waxaa lagu daraa listka caalamiga ah ee AFZ ee ku yaal shabakada www.bdsmovement.net (magaca booska iyo magaalada).

Haddii aad xiisanaysa, kooxdayada ololaha ayaa kaa caawin doonta shirkaddaada ama bulshadaada tallaabo kasta! Xor baad u tahay inaad kala xiriirto iimaylka: bds@sumud.fi.

## Ka warran haddaynu khalad samayno?

Qof kastaa wuu qaldami karaa. Haddii aad soo gadatay shay ama gaddey alaabo liistka qaadacaadda ama aad taageertay apartheidka Israa'iil sinaba, waxa ugu muhiimsan waa inaad saxdo khaladka. Ololuhu wuxuu ujeedkiisu yahay in la siiyo meel kasta fursad si ay uga dhigto hawlgalladeeda anshax badan oo sidaas darteed taageerto halganka Falastiiniyiinta ee xuquuqda aadanaha. Waxaa ka fiican inaad ku biirto ololaha oo aad khalad samayso intii aanad taageerin ololaha awalba.

Waxaad mar walba la xiriiri kartaa kooxda ololaha taageero.

## Maxay tahay inay qaadacaan Aagga ka banaaan Apartheid?

Aagagga Apartheid ka banaan wexee qaadacay shirkadaha, badeecooyinka, iyo summada ay beegsanayaan qaadacaada bartilmaameedka ah ee dhaqdhaqaaqa BDS. Qaadacadu bartilmaameedyadu way isbedelaan muddo ka dib, maadaama ololaha qaadacaada qaarkood lagu guulaysto qaarna lagu daro bartilmaameedyo cusub. Isbeddeladan waxa lagugu soo kordhin doonaa joornaalka BDS. Hoos waxaa ku yaal liiska BDS ee hadda jira.

**AFZs waa inay qaadacaan alaabta iyo shirkadaha soo socda:**

- Alaabooyinka, khudaarta, iyo miraha ka imanaya Israa'iil ama degsiimooyinka Israa'iil ee sharci-darrada ah
- AXA
- Carrefour
- Chevron, oo ay ku jiraan Caltex iyo noocyada Texaco iyo Noble Energy oo ay Chevron leedahay
- Dell
- Disney+
- Hewlett Packard Inc (HP Inc)
- Intel
- Siemens
- SodaStream
- RE/MAX
- The Coca-Cola Company
- McDonald's, Burger King, Papa John's, Pizza Hut
- WIX
- Wolt
- Barclays
- CAF
- Cisco
- Nidaamyada Elbit
- HD Hyundai/Volvo/CAT/JCB
- HikVision
- TKH Security

**AFZs waa inay qaadacaan shirkadahan haddii beddel macquul ah uu jiro. Meesha Apartheid ka madax banaan wexee taageeraan ololaha cadaadiska dhaqdhaqaaqa BDS ee ka dhanka ah shirkadahan:**

- Airbnb/Booking.com/Expedia
- Google iyo Amazon (US)
- Warshadaha Dawooyinka ee Teva

## Shirkado kale oo badan ayaa si uun ama si kale u taageera midabtakoorka Israa'iil. AFZ miyaanay qaadin dhamaantood?

Istaraatiijiyadda dhaqdhaqaaqa BDS waa in la beegsado qaadacaada, cadaadiska, iyo cunaqabataynta shirkadaha iyo badeecadaha gaarka ah si ay u yeeshaan saamaynta ugu weyn ee suurtogalka ah. Aagagga Xorta ah ee Apartheid-ka ayaa taageero siiya qaadacaada iyo ololayaashan la beegsaday. Waxaad wax badan oo ku saabsan waxtarka qaadacaada la beegsaday ka akhri kartaa www.bdsmovement.net.

Waxaanu dhiirigelinaynaa oo aanu ka caawinaynaa Aagagga Apartheid-ka ka madax banaan si ay u qaadacaan badeecadaha kale iyo shirkadaha ka qaybqaata midab-takoorka Israa'iil ilaa xadka awoodooda.

## Waa maxay qaadacaada dhaqanka iyo tacliinta?

Ololaha Falastiiniyiinta ee qaadacaada tacliinta iyo dhaqanka ee Israel (PACBI) ayaa ku dhawaaqday qaadacaada ka dhanka ah machadyada tacliinta iyo machadyada dhaqanka ee Israel 2004tii.

Qaadacaada dhaqanku waa jawaabta dadaalka hay'adaha dhaqanka ee Israel si ay u joogteeyaan oo ay caadi uga dhigaan qabsashadii sharci darada ahayd ee Israa'iil, gumaysiga Falastiiniyiinta, iyo midab takoorka. Apartheid- Aagagga ka madax banaan ma abaabulaan xaflado dhaqameed ay maalgeliso Israa'iil ama hay'ado taageero muuqata ah. Aagagga Apartheid-ka ka madax banaan sidoo kale kama qaybqaataan hawlaha taageeraya caadiyeynta midab-takoorka iyo xad-gudubyada xuquuqda aadanaha. Qaadacadu waxay khusaysaa hay'adaha, ma khusayso shakhsiyaadka Israa'iiliyiinta ah.

Qaadacaada akadeemiyada ayaa ujeedadeedu tahay in ay jarto xiriirka jaamacadaha Israel iyo machadyada kale ee tacliinta. Jaamacadaha Israa'iil waxay ku lug leeyihiin ilaalinta shaqada sharci darrada ah ee Israa'iil iyo midab-takoorka waxayna ka qaybqaataan, waxyaabo kale, horumarinta qalabka ay isticmaalaan milatariga iyo si nidaamsan u takoorida Falastiiniyiinta. Aagagga Apartheid-ka ka madax banaan lama wada shaqeeyaan machadyada tacliinta Israa'iil.

Kooxdayada ololaha ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qaadacaada dhaqanka iyo tacliinta.

Halkan ka akhri arintaan: www.bdsmovement.net/pacbi

## Waa maxay Dhaqdhaqaaqa BDS?

BDS waa dhaqdhaqaaq caalami ah oo ay Falastiiniyiintu hogaamiso ujeedaduna tahay in la dhimo taageerada dhaqaale ee dawladda Israa'iil. BDS waxaa loo fasiri karaa qaadac, dhaqaalo ka leexsasho, iyo cunaqabatayn. Dhaqdhaqaaqa BDS wuxuu ku salaysan yahay mabda'a fudud: Falastiiniyiintu waxay xaq u leeyihiin xuquuq la mid ah dad kisto. BDS dhiirigelin waxay ka heshaa halganka lagaga soo horjeedo midab-takoorka South Afrika iyo qaadacaada la xidhiidha.

Dhaqdhaqaaqa Finnishka ee BDS waa qayb ka mid ah Shabakadda Falastiin Sumud ee Finnishka.

Halkan ka akhri arintaan: www.bdsmovement.net

## Waa maxay Apartheid?

Apartheid waa nidaamka hay'adaysan ee kala soocida iyo dulmiga. Waxay magaceeda ka heshay siyaasadihii midab-takoorka ee South Afrika lagu dhaqmi jiray qarnigii 20-aad ('Apartheid' macnaheedu waa gooni-u-saar xagga luqadda Afrikaans).

Axdiga Qaramada Midoobay ee 1976 wuxuu qeexayaa dembiyada midab-takoorka inay yihiin ficillo loogu talagalay abuurista iyo ilaalinta xukunka koox isir ah oo kala sarreeya isir kale. Apartheidka waa gumeysi lagu beegsanaayo isir ama qolo gaar ah.

Falalka bini'aadantinimada ka baxsan waxaa ka mid ah:

- Diidmada xaqa nolosha, oo ay ku jiraan dil ama dhaawac halis ah oo jireed ama maskaxeed loo geysto jirdil, la dhaqan sharaf dhac, ama xaddidid xorriyadda.
- Xarigga iyo haynta sharci-darrada ah
- Dad wareejinta
- Xoog-saarid/Adoonsi
- Cadaadis lagu hayo koox
- Barakicin qasab ah
- Ka hortagga ka qaybgalka siyaasadda, bulshada, dhaqaalaha, iyo nolosha dhaqanka ee dalka.

Amnesty International iyo ururada kale ee xuquuqul insaanka waxay u aqoonsan yihiin siyaasadaha kala soocida Israa'iil inay yihiin midab-takoor iyo dembiyo ka dhan ah aadanaha. Dambiyada Apartheid waa mid ka mid ah dembiyada caalamiga ah ee ugu daran.

Ma rabtaa inaad wili wax kale ka maqasho arintaan?
Nagala soo xidhiidh bds@sumud.fi.

Waxaad sidoo kale nagu raaci kartaa Instagram
@boikotoiapartheidia iyo Facebook.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ololaha: www.sumud.fi

SUMUD
THE FINNISH PALESTINE NETWORK
صُمُود - شَبكة فِلسطين الفنلَنْديّة.

BDS FINLAND